
# Pulmonary Stenosis (PS)

Dhuubashada Daboolka Sambabka ama PS




Ogeysiis:


The Children's Heart Clinic 2530 Chicago Avenue S, Ste 500, Minneapolis, MN 55404
612-813-8800 * Toll Free: 1-800-938-0301 * Fax: 612-813-8825
Children's Hospital of Minnesota, 2525 Chicago Avenue S, Minneapolis, MN 55404




© 2012 The Children's Heart Clinic

**Dhuubashada Daboolka Sambabka ama PS**
Pulmonary Stenosis-Valvar (PS)

Pulmonary stenosis (dhuubashada daboolka sambabka ama PS) (dhuubasho) heerka daboolka sambabka waxaa la arkaa natiijada daboolka liifadda ah ee ku dheggan ama ay ka maqan yihiin barkulankooda (barta ay murqaha daboolku isugu yimaadaan) iyo god yar oo ah dabool (furan). PS waxay noqotaa heerar kala duwan oo ah xannibaadda qulqulka dhiigga ee qalbaca midig. Qalbaca midig uma kobco (sameysmo) dhallaanka qaba PS *daran*, oo waxaa la arkaa marka uusan daboolka sambabbada jirin (maqan yahay). Daboolka midig ee cabbirka caadiga ah waa uu ka fudud yahay noocyada yar ee ah PS daran. PS natiijadeedu waa adkaan, aan joogto ahayn, qeyb aan dhaqaaqeyn oo aalaaba lagu arko carruurta qabta cillad la yiraahdo Noonan. PS waxa ay dhici kartaa iyada oo ay jirto Tetralogy of Fallot (Cilladda Dhiigga Wadnaha ama TOF), Transposition of the Great Arteries (Isdabamarka Halbowleyaasha Waaweyn ama TGA), iyo double outlet right ventricle (labada dhinac ee qalbaca midig ama DORV).

**Wiisiteynta/Calaamadaha Jirka:**

- Dhallaanka iyo carruurta in laga helo PS khafiif ah oo ah calaamad la'aan.
- PS ah dhexdhexaad ama daran ayaa keeni karta naqaska oo ku dhega (neefsasho adag), xanuun ah xabadka, congestive heart failure (wadnaha oo dhiigga soo saari waaya ama CHF), iyo daal.
- Dhallaanka cusub ee qaba PS waxay keeni karaan in ay xumaato quudinta, korriinka, naqaska oo degdeg ah (neefsasho boobsiis ah), beerka-weynaada ( beerka oo barara), iyo midabka oo doorsoo-ma (midabka maqaarka oo ah buluug).
- Qac la socota dhiigga kore iyo guux ayaa ka jira agagaarka xabadka kore bidix oo waxay ku kala qeybsameysaa dhawaaqa labaad ee wadnaha. Guuxa ayaa laga yaabaa in uu u gudbo dhinaca gadaale. Marka uu sii dheeraato guuxu, waa ka sii daraya dhuubashada.
- Guuxa dhexe ee dhiigga kore ayaa laga yaabaa in uu gaaro dusha sare ee daboolka sambabka iyadoo u sii gudbeysa dhabarka iyo kilkilaha ilmaha qaba PS ka fog wadnaha.

**Cilladsheegid:**

- Raajo laabta: Cabbirka wadnaha oo caadi ah; qeybta halbowlaha sambabka ah. Wadne-weynaad (wadnaha oo barara) ayaa dhici kara marka la arko CHF. Dhallaanka qaba PS daran waxaa lagu arkaa meelo sambabka ah oo madow, oo waxaa xumaanaya qulqulka dhiigga ee sambabka.
- EKG: Caadi in uu yahay PS fudud. Leexadka dhidibka midig iyo unugweynaad ah qalbaca midig ayey keeni kartaa PS ah dhexdhexaad ama daran.
- Uultarasawnka wadnaha: Cilladsheegid.

**Maareynta/Daaweynta Caafimaadka:**

- Dhallaanka cusub ee qaba PS daran waa in la daaweeyo si ay xididka dheeraadka ah ee loo yaqaan jilcinta dhiiga E1 oo waa in lagu sameeyo hagaajin buufin ah sheybaarka tuubagelinta si wax yar ka dib dhalashada loogu furo qulqulka dhiigga sambabka.
- Qaliinka hagaajinta/beddelka ayaa lagama maarmaan u noqon kara kiisaska dhan ee ilmaha qaba PS ah dhexdhexaad, daran, ama halis.
- Dhaqdhaqaaqa ayaa loo diidi karaa ilmaha qaba PS daran oo keliya.
- La-socosho ah mudda-dheer wadnaha iyo mararka qaarkood sawirka wadnaha ayaa loo baahan doonaa si loo ogaado xaalka PS, xataa ka dib qalliinka ama tuubagelinta sheybaadhka.

**Natiijooyinka Mustaqbalka-Fog:**

- Heerka ay tahay PS waa *inaysan* uga sii darin dhallaanka/ilmaha qaba *PS* fudud.
- Heerku waa *inuusan* uga sii darin dhallaanka/ilmaha qaba PS ah dhexdhexaad ilaa mid daran.
- Natiijooyinka mustaqbalka-fog waa mid ku kala duwan oo ku xiran shaqada daboolka sambabka iyo jiritaanka ama maqnaanshaha xanuun kale oo ah wadnaha ama xanuun u weheliya.
- Bakteeriyada endocarditis prophylaxis ayaa laga yaabaa in laga baaro ilmaha u baahan in laga beddelo daboolka sambabka.


© 2012 The Children's Heart Clinic